

# Ra'yi-celin & Cabashooyin



## Cabashooyin

### Hordhac

Adeegga Dacwad-ku qaadidda Maxkamaddeed (The Crown Prosecution Service (CPS)) wuxuu higsanayaa inuu bixiyo adeeg heerka ugu sareeya ah iyo in arrimaha si sax ah loo sameeyo. Hase yeeshee, waxaa jiri doona waqtiyo aanan sidaas yeelin.

Haddii aadan ku qanacsanayn adeegga aan bixinay, aadna doonayso inaad cabasho samayso, waa inaad raacdaa hagidda qaybtan ee buug-yaraha.

### Maxaan cabasho ka samayn karaa?

Waxaad cabasho ka samayn kartaa arrin kasta ee adeeggayaga ah.

Macluumaad kooban ayaa caadiyan laga bixin karaa kiiska socda oo keliya. Waxaan xaq u leenahay inaan wax ka qaban cabasho kiis socda, haddii, samaynta sidan, ay waxyeelaynayso nidaamka.

Ma ra'yi kama bixin karo qaab-dhaqanka ururada kale, sida booliiska, maxkamadaha ama gudiyada sharciga. Haddii aad cabasho ka qabto urur kale waa inaad ayaga u gudbisaa. Liiska lamabarada xariirkooda ee kuwan iyo hay'adaha kale ee anfacaya waxaa laga heli karaa qaybta "Faahfaahinta Xariirka" ("Contact Details") ee dhammaadka buug-yarahan

### Kuma ayaa cabasho samayn kara?

Waxaan kaliya wax ka qaban doonaa cabashadaada haddii aad si toos ah uga qayb qaadatay adeegga aad doonayso inaad ka cabato. Kiisaska, tani caadiyan waa dhibbanaha (ama kiisas dhibbanaha uu dhintay, qoyskooda), marqaati, is-difaace\* ama qareen matalaya ayaga.

Waxaad u magacaaban kartaa matale cabasho kuu sameeya. Waxaad u baahan doontaa inaad siiso **qoraal oggolaansho ah** matalaha inuu hawl kuu fuliyo. Waxaan la shaqayn doonaa matalaha, ulana dhaqmaynaa sidii inay yihiin qofka cabashada isagu samaynaya.

\*Nidaamka cabashooyinka ee CPS ma ahan waddo ay is-difaacayaashu ku raadsadaan in kiiska lagu haysto laga daayo ama wax laga badalo xukunkooda. Haddii aad tahay is-difaace xaaladdan cabashadaada looma tixgelin doono inay qayb ka tahay nidaamkayaga cabashooyinka. Waxaa haboon inaad raadsato talo-bixin sharci oo madax-bannaan.

Haddii aad tahay xubin dadwaynaha ah oo aan shaqo ku lahayn arrinta aad doonayso inaad cabasho ka samayso, waxaad xaq u leedahay inaad sharaxaad ka hesho maareeyaha mas'uulka ka ah arrinta cabashadaadu ku saabsan tahay. Cabashadaada, hase yeeshee, lama qaadayo oo lama marinayo nidaamka cabashooyinka.

### Mudo intee ah ayay tahay inaan ku sameeyo cabasho ?

Waxaan kaliya tixgelin doonaa cabashooyinka lagu helo **liix bilood gudahood** ee arrinta laga cabashada laga samaynayo

dacwoonayo. Haddii aadan cabashadaada ku samayn waqtigan xadidan gudhiisa, kama fiirsan doono cabashadaada .

Haddii aadan weli qanacsanayn ka dib markii lagaaga soo jawaabey cabashadaadii, aadna doonayso in cabashadaada kor loo sii qaado, waa inaad sidan ku samaysaa **hal bil gudaheed**. Haddii aadan cabashadaada kaga dabategin waqtigan xadidan gudhiisa, waan diidi doonaa in aanu si intaa ka badan uga fiirsano cabashadaada .

### **Sidee loola dhaqmi doonaa cabashadayda muxuuse ahaan doonaa maxsuulku?**

Waxaanu higsanaynaa in aanu si dareen leh, cadaalad ah oo kalsooni leh (oo waafaqsan waajibaadkayaga sharci) ugu hawlgalo cabashooyinka. Waan kuu sheegi doonaa haddii cabashadaada laysku hawlay , dhammaanteed ama qayb ahaan, ama la diiday.

Haddii cabashadaadu gar yeelato raali gelin ayaan bixin doonaa, isku dayi doonaa inaan arrinta saxno, haddii ay macquul tahay, qaadnona tallaabooyin aan ku xaqiijinayno inaysan mar kale dhicin. Hase yeeshee, ma ahan siyaasaddayada in aanu magdhow siino xubnaha dadwaynaha.

### **Sidee ayaan cabasho u samayn karaa?**

Waxaad cabasho u samayn kartaa teleefoon ahaan, aad u dirto xubin shaqaalaha CPS ah, qoraal ahaan ( warqad ahaan ama buuxinta foomka ku lifaaqan buug-yarahan), ama maritaanka boggayaga internet-ka: [www.cps.gov.uk](http://www.cps.gov.uk)

In kasta oo aanu isku dayi doono ku xalinta cabashadaada teleefoon ahaan, waxaa laga yaabaa in aanu ku waydiino inaad cabashadaada qoraal ahaan ku soo gudbiso (tusaale ahaan haddii aanu telefoonka ku kala caddayn kari wayno nooca cabashadaada ama haddii cabashadaadu ay tahay nooc adag). Dhammaan cabashooyinka ku jira marxaladda saddexaad **waa in** lagu sameeyaa qoraal ahaan.

Haddii aadan awoodin in aad cabashadaada qoraal ahaan ku soo gudbiso waxaan ku faraxsanahay ku helitaanka:

- Maqal ama cajal fiidiyow; ama
- Qoraal ahaan uu kuu sameeyo saaxiib, qaraabo, qareen, ama xubin hay'ad degaan oo aan sharci la xidhiidhin, sida Xafiiska Talo-bixinta Shacabka (Citizens' Advice Bureau) oo ku matalaya. Waxaad u baahan doontaa inaad qoraal ahaan ku bixiso oggolaansho xaqiijinaya in matalaha uu awood u leeyahay inuu ku matalo.

### **Macluumaadkee ayaan u baahanahay inaan bixiyo?**

Si loo xaqiijiyo in cabashadaada loogu hawlgalo si dhaqso ah oo waxtar leh , waa inaad ku sheegtaa inaad cabasho samaynayso adigoo maraya nidaamkayaga cabashooyinka aadna faahfaahin buuxda ka bixisaa cabashadaada .

Waa inaad ku qortaa:

- Magaca buuxa;
- Xariirka arrinta dacwadda; iyo
- Cinwaanka boostada.

Haddii cabashadaadu la xariirto kiis, waa inaad sidoo kale ku dartaa:

- Magaca (yada) is-difaacaha(yaasha);  
**Fadlan ogow inaan u baahanahay magaca(yada) is-difaacaha(yaasha) si aan u aqoonsano kiis.**
- nooca iyo taariikhda(aha) wixii dambi(yaal) ah;
- goobta fal-dambiyeedka(yaasha) ka dhacay;
- xoogga booliis ee baaray fal-dambiyeedka(yaasha); iyo
- maxkamadda(aha) u hawlgalaya kiiska (haddii kiisku gaaray maxkamad).

Haddii aad hore isugu dayday in aad si aan rasmi ahayn welweladaada ula xaliso CPS, waa inaad bixisaa faahfaahinta xubinta shaqaalaha CPS ee ku caawiyay.

### **Goorma ayaan jawaab filayaa ?**

Waxaanu higsanaynaa in aanu kuu xaqiijino helitaanka cabashadaada **muddo 3 maalmood shaqo gudahood ah** oo ka bilaabata helitaanka cabashada.

Waxaanu higsanaynaa in aanu kaga jawaabno cabashooyinka wejiga koowaad iyo labaad **muddo 20 maalmood shaqo gudahood ah oo ka bilaabata** helitaanka cabashada.

Waxaanu higsanaynaa in aanu kaga jawaabno cabashooyinka wejiga saddexaad **muddo 40 maalmood shaqo gudahood ah** oo ka bilaabata helitaanka cabashada.

Haddii aan awoodi wayno daboolidda yoolalkan, waan kula soo xariiri doonaa, si aan kuugu sharaxno sababta aanan u dabooli karin iyo goorta aan rajaynayno ka jawaabidda.

### **Waa maxay wejiyada nidaamka cabashooyinka ?**

#### **Qaraar aan toos ahayn**

Shaqsiyaad badan oo aan ku qanacsanayn adeegga aan bixinay ayaa doonaya in qof uu eego dhibaataada sida ugu dhaqso badan. Tallaabada ugu horaysa waa la xariiridda xafiiska ama xubinta shaqaale ee wax ka qabtay arrinta. Haddii aanan awoodin xalinta qanac la'aantaada, markaa waxaa laga yaabaa inaad doonayso inaad sii wado cabasho rasmi ah .

#### **Wejiga koowaad**

Cabashadaada marka hore waxaa lagu aadinayaa maareeyaha ay qusayso ee mas'uulka ka ah arrinta laga cabanayo . Arrinta la xariirta cabashooyinka ee ku saabsan shaqo-kiis, tan waxay caadiyan ahaanaysaa maareeyaha qareen ee ku haboon. Waxay eegayaan cabashadaada kaagana soo jawaabayaan.

#### **Wejiga labaad**

Cabashooyinka aan la xalin waxaa loo gudbinayaa maareeye sare. Arrinta la xariirta cabashooyinka ku saabsan shaqada-kiiskayaga, tan caadiyan waxay ahaan doontaa Madaxa Dacwad-ku qaadidda Maxkamaddeed . Waxay eegayaan cabashadaada kuuna soo jawaabayaan.

#### **Wejiga Saddexaad**

Cabashooyinka aan lagu xalin wejiga labaad waxaa loo gudbinayaa Unuggayaga Is-gaarsiinta (Correspondence Unit,CU)). Waxay ka fiirsan doonaan arrimaha aad sheegtay, iyagoo kaala talinaya sida arrinta loogu hawlgelayo . Tan waxaa laga yaabaa inay ku lugyeelato in cabashada loo gudbiyo xubin kale oo shaqaalaha ah, kaasoo eegaya kuuna soo jawaabaya. CU caadiyan ma eegi doonto cabashooyinka la xariira kiisaska socda, maadaama tani jebin karto nidaamyada.

## **Xafiiska Guddoomiyaha Maxkamadda Sare**

Haddii aad wada martay nidaamkayaga cabashooyinka laakiin aadan weli ku qanacsanayn sidii cabashadaadii loogu hawlgalay,, waxaad cabashadaada u gudbin kartaa Xafiiska Guddoomiyaha Maxkamadda Sare (Attorney General's Office ,AGO)). AGO wuxuu ka fiirsan doonaa in CPS ay si sax ah u raacday siyaasadda iyo hagidda cabashooyinka . **Hase yeeshee, Ma samayn doono, , dib-u-eegid go'aamo sharciyeed ah.**

## **Ra'yi-celin**

Adeegga dacwad-ku qaadidda Maxkamaddeed (CPS) waxay ku dhiiro gelinaysaa xubnaha dadwaynaha inay noo soo gudbiyaan ra'yi-celin wanaagsan iyo mid xun labadaba oo ku saabsan siyaasadahayaga, nidaamyadayada, adeegyadayada iyo waxqabadkayaga . Waan soo dhawaynaynaa aragtiyadaada ee waaya'aragnimadaada la macaamildayada ama aragtiyadaada ku saabsan wax adeegyadayada ah.

Xubin kasta oo ka mid ah dadwaynaha ayaa CPS siin kara ra'yi-celin, iyadoo aysan jirin waqti u cayiman siinta aan na siiso ra'yi-celin.

Waan diiwaan gelin doonaa oo lafo-gurid ku samayn doonaa ra'yi-celintaada, si aan u horumarino adeegayaga si ay u ahaadaan ku daboola baahiyaha dadwaynaha.

- Haddii aad doonayso inaad na siiso ra'yi-celin rasmi ah, waxaad sidan u yeeli kartaa:
- adigoo buuxinaya foomka la socda buug-yarahan, una diraya isku-duwaha cabashooyinka /ra'yi-celinta ee Goobta CPS ku haboon ama Agaasinka;

- warqad ahaan isku-duwaha cabashooyinka /ra'yi-celinta ee Goobta CPS ku haboon ama Agaasinka;
- teleefoon ahaan; ama
- la marayo boggayaga internet-ka.

Macluumaad dheeraad ah oo waxtar leh, sida faahfaahinta xariirka ee xafiiska Goobta, waxaa laga heli karaa boggayaga internet-ka. Haddii kale, waxaad waci kartaa Xog-raadinta CPS ee 020 335 70000 si aad u hesho macluumaadkan.

## **Faahfaahinta Xariirka**

Macluumaad waxtar leh, sida faahfaahin xariirka xafiisyada Goobta, waxaa laga heli karaa boggayaga internet-ka: [www.cps.gov.uk](http://www.cps.gov.uk)

## **XARIIRADA ADEEGGA DACWAD-KU QAADIDDA MAXKAMADDEED**

### **CPS Correspondence Unit (Unugga Is-gaarsiinta CPS)**

Telefoon: 020 335 70899

limayl xariirka guud: [enquiries@cps.gsi.gov.uk](mailto:enquiries@cps.gsi.gov.uk)

### **Freedom of Information Act & Data Protection Act requests (Codsiyada Xeerka Xoriyadda Macluumaadka & Xeerka Difaacidda Xogta)**

Telefoon: 020 335 70000 (switchboard)

limayl: [FOIUnit@cps.gsi.gov.uk](mailto:FOIUnit@cps.gsi.gov.uk)

**Human Resources (Khayraadka Bani'aadmiga)**

Telefoon: 020 335 70000 (switchboard – boor-gudbin)

limayl: HR.Advice@cps.gsi.gov.uk

Telefoon: 01512396388 (shaqaalo-qorid)

limayl: Recruitment@cps.gsi.gov.uk

**Policy (Siyaasadda)**

Telefoon: 020 335 70000 (switchboard – shantaraal -gudbin)

limayl: HQPolicy@cps.vcgsi.gov.uk

**Procurement (Gudbin)**

Telefoon: 020 335 70000 (switchboard - boor-gudbin)

limayl: procurement@cps.gsi.gov.uk

**Prosecution witness expenses (kharashaadka marqaatiga dacwad-ku qaadidda )**

Telefoon: 01924 205 221/261

limayl: witness.expensesenquiry@cps.gsi.gov.uk.

**Publications (Daabacaadaha)**

Telefoon: 020 335 70913

limayl: publicity.branch@cps.gsi.gov.uk

**Ururada kale ee waxtarka leh****The Attorney General's Office (Xafiiska Guddoomiyaha Maxkamadda Sare)**

Telefoon: 020 7271 2492

limayl: correspondenceunit@attorneygeneral.gsi.gov.uk

Bogga Internet-ka: www.attorneygeneral.gov.uk

**The Home Office (Wasaaradda Arrimaha Gudaha)**

Telefoon: 020 7035 4848

limayl: public.enquiries@homeoffice.gsi.gov.uk

Bogga Internet-ka: www.homeoffice.gov.uk

**Independent Police Complaints Commission (Guddiga Madaxa-bannaan ee Cabashooyinka Booliiska)**

Telefoon: 08453 002 002

limayl: enquiries@ipcc.gov.uk

Bogga Internet-ka: www.ipcc.gov.uk

**The Ministry of Justice (Wasaaradda Cadaaladda)**

Telefoon: 020 3334 3555

limayl: general.queries@justice.gsi.gov.uk

Bogga Internet-ka: www.justice.gov.uk

**Victim Support (Caawinta Dhibbanaha)**

Telefoon: 0845 30 30 900

limayl: supportline@victimsupport.org.uk

Bogga Internet-ka: www.victimsupport.org.uk

**Citizens Advice (Talo-bixinta Shacabka)**

Hel CAB degaanka: www.citizensadvice.org.uk/index/getadvice

Bogga Internet-ka: www.citizensadvice.org.uk

*Waa inaad buuxisaa qaybaha calaamadaysan \**

**Faahfaahintaada**

\*Magac buuxa (Mr, Mrs, Miss, Ms, kale):

\*Cinwaanka boostada:

Lambarka teleefoonka:

Cinwaan iimayl:

\*Nooca ra'yiga (sax mid): Cabasho  Ra'yi-celin

Waa maxay qaabka noogu fiican ee aan kuugula soo xariiri karno haddii aan sidaas u baahano? (sax mid):

Warqad  Teleefoon  Iimayl

**\*Ra'yigaaga:**

Fadlan eeg qaybta 'Macluumaadkee ayay tahay inaan bixiyo?' ('What information do I need to provide?') buug-yarahan ama boggayaga internet-ka ka hor buuxinta qaybtan.

**Ogow:** Haddii qof kale cabasho u samaynayso, waa inaad bixisaa **qoraal oggolaansho ah** oo aad ku matalayso ayaga.

*Fadlan isku laab, xir, boostana ku dir ra'yiga la buuxiyay*

Nuqulo dheeraad ah oo dukumeentigaan ah iyo warbixino ku saabsan luuqadaha iyo qaababka kale ayaa laga heli karaa:

CPS Communication Division  
Telefoon: 020 335 70913  
limayl: [publicity.branch@cps.gsi.gov.uk](mailto:publicity.branch@cps.gsi.gov.uk)

Wixii macluumaad ku saabsan Adeegga Dacwad-qaadidda Maxkamadeed, iyo daalacashada ama internet kala soo baxid nuqul elektroonik ah oo dukumeentigaan ah, fadlan booqo boggayaga internet-ka:

[www.cps.gov.uk](http://www.cps.gov.uk)

Waxaa daabacay Blackburns of Bolton